

## **KU DHAWAAQIDA IS DHEX GALKA**

Magaca dambe \_\_\_\_\_

Magaca koowaad \_\_\_\_\_

Taariikhda Dhalashada \_\_\_\_\_

Dhalashada \_\_\_\_\_

### **Hore**

Waxaad soo gudbisay sheegashada dheefaha hoosta macnaha-la baadhaymashruuca dakhliga ugu yar Sidaas awgeed waxaanu filaynaa inaanu dedala u samayno bulshadda jirta. Gudaha Austria, dadka asalka kala duwan iyo dhaqanadu si nabad ah ayay ugu noolaanayaan. Tan waxaa damaana qaadaya sharciga oo waxay muhiim u tahay dadkeeda. Gobolka Austria Hoose waxa uu jeclaan lahaa inuu kugu wargeliyo adiga sharciyada aasaasiga ah ee wada noolaanshaha gudaha Austria. Waxaanu sidoo kale jeclaan lahayn inaan kugula talino adiga wax ku saabsan tallaabooyinka isdhexgalka waxaanu filaynaa in dadka ku nool Austria ay gutaan si ay u hubiyaan wada jirka bulshadda iyo wada jirka wanaagsan.

### **Qiimaha aasaasiga ah iyo sharciyada ku noolaanshaha Austria**

Ugu noolaashaha sidii bulsho gudaha Austria waxay ku salaysantahay qiimayaasha aasaaska ah ee soo socda ee sharciga iyo nidaamka bulsheed, kuwaas oo ku habboonaan doona dhammaan dadka Austria oo lagu sharaxay si faahfaasan muddada kooraska is Dhexgalka ay abaabushay Sanduuqa Isdhexgalka Austria (OIF).

- Austria waa wadan muxaafid ah oo u heelan sharafta aadamaha, xoriyada iyo sinaanta Gudaha Austria, qof kastaa wa xor inuu u noolaada qaabka ay

doortaan gudaha haykalka sharciga. Gudaha Austria, waa muhiim in haweenka iyo raggu ay yeeshaan xuquuq isku mid ah sharciga hoostiisa iyo dhammaan dhinacyada nolosha.

- Austria waxaa lagu maamulaa xeerka sharciga kaas oo maamulkiisa iyo maxkamaddaha ay si gooniya ugu shaqeeyaan qaabka sharciga. Boolisku sidaas awgeed waxay wax u qabtaa keligooda si waafaqsan sharciga, sida dhammaan dadka jooga Austria waxaa waajib ku ah inay adeecaan sharcigeeda. Qaranku waxaa uu ilaaliyaa xoriyada diinta ilaa inta lagu dhaqmayo haykalka sharciga. Sharciyada diintu kama sareeyaan sharciga Austria. Dowladu kuma dhaqanto si waafaqsan sharciyada ama qoraalada diinaba, laakiin qaababka sharciga.
- Austria waa dimuqraadiyada taas oo sharcigeedu ay ku salaysanyihiin dadka. Sharciyada lagu dhex abuuray falanqaynta iyo wada hadalka wakiilada ee dadka, lagu doortay doorashooyin xor ah. Waxbarashaddu waa daruuri lama hiraan u aha ka qayb galka firfircoon ee falanqaynta siyaasada iyo wada sheekaysiga dad waynaha. Dugsiga barbaarinta, muhiim ahaa iyo waxbarashadda dugsiga sare waa ku waajib wiilasha iyo gabdhaha.
- Austria waa jamhuuriyada lagu aasaasay mabaadi'da wadajirka bulshadda. Waxay u baahantahay shaqo adag iyo u heelanaan qof kasta oo leh hadaf bulsheed oo wanaagsa ka dhexeeya ah. Sidi bulsho ku salaysan wadajirka, qof kastaa oo jooga Austria waa inuu ku dedaalaa inuu gaadho madax banaani dhaqaalaha ah sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Ku xad gudub kasta oo dheefaha qaranka si adag ayaa loo ciqaabi doonaa.
- Austria waa qarab federaal ah. Dastuurkeedu iyo qimakeeda huwan sharcigeeda iyo nidaamkeeda bulsho ayaa sameeya hawkalka kala duwanaanshaha dhaqanka Austria.
- Austria waa wadan leh kala soocnaanta awoodaha halka shaqooyinka dowladda ay kula qaybsanyihiin waaxo kala gooni iyo kala madax banaan, kuwaas oo is xakameeya. Tani waxay hubinaysaa in Austria aanu qof keliya lahayn awooda buuxda guudka qaranka.

Isku day kasta oo qiyamkan aasaasiga ah waxay keeni kartaa ciqaabta sharciga ah. Tan waxaa ka mid ahaan kara ganaax, xukun hayn ah ama xataa kala noqoshada oggolaanshahaaga degenaanshaha.

### **Tallaabooyinka isdhexgalka**

Tallaabooyinka isdhexgalka waxay siiyaan qaabka dadka ku nool Austria si ay ugu sameeyaan nafahooda risiq iyaga iyo qoysaskooda siiba ka qayb galaan nolosha bulshadda. Qof kasta oo hela oggolaanshaha degenaanshaha si uu ugu noolaado Austria waa inuu u hogaansamaa hindisayaasha isdhex galka soo socda:

- Baro Af Jarmalka - Xaadirka kooraska luqadda Jarmalka waa waajib.
- Helida aqoon ku saabsan qiyamka aasaasiga ah ee bulshadda iyaddoo la xaadirayo kooraska isdhexgalka.
- Qaad dhamman tallaabooyinka habboon si loo horumariyo degenaanshaha bulshadda (aqbal fursadaha tababarka shaqada, mutadawacnimada gudaha bulshadda ama wixii ah deeqaha, iwm).
- Hel takhasuska loogu talo galay shaqada macaashka leh oo muuji u diyaar ahaanshaha shaqo galka.

Xad gudub kasta oo sharciyada ah ama diidmada in loo hogaansamo tallaabooyinka isdhexgalka waxay keeni kartaa ciqaab. Tan waxaa ka mid ahaan kara yaraynta qadarka dheefaha ee la helay ama ciqaabaha.

Waxaan halkan ku dhawaaqayaa in aan akhriyay oo fahmay macluumaadka bayaanka is dhexgalka oo aqbalay inaan u hogaasamo qiyamka aasaasiga ah ee wada noolaanshaha gudah Austria si buuxda. Waxaan in dheeraad ah aqbalayaa inaan dhammaysiro waajibaadyada qoraalkan ku jira laftaydu siiba wanaaga bulshadda gebi ahaan iyo sidoo kale inaan ku dedaalo aniga laftaydu si aan u hubiyo is dhexgalka.

---

**Saxeexa**

Codsadaha ama wakiilka sharciga ah

---

Goobta / Taariikhda